

## XAQUUQDA

**1.** Waa inaad saacadiiba qaadataa lacag aan ka yareyn tan ugu yar ee ay dowladdu qoondaysay, waana inaad xisaabsataa saacadahaaga oo dhan marka lagu daro waqtiyada diyaargarowga, xirniinka, bilowga iyo shirarka la idiin qabto.

**2.** Waxaa DHICI KARTA INAAN lacag lagaaga goosan haddii aad wax jebiso, haddii daqligu yaraado, qalabka lagu shaqeeyo ama labiska shaqada. Mararka qaarkood waxaa la ogol yahay iney dhacaan wax nidaamkan ka reeban. Lacag kasta oo lagaa jarto waa inaad qoraal ku ogolaataa.

## XAQUUQDA

**3.** Mar walba oo mushaarka lagu siiyo waa inuu la socdaa liis sheegaya lacagtii mushaarkaaga laga goostey sida canshuurta.

**4.** Meel ku qor inta saacadood ee aad shaqeysay. Haddii ay kala duwanaadaan saacadaha kuu qoran iyo kuwa loo shaqeeyaha uu qortay waa inaad dib isula fiirisaan.

**5.** Qasab MAAHA fasaxa nasashadu, laakiin waa inaad heshaaa waqti aad ku isticmaali karto musqusha kuugu dhow afartii saacba hal mar.

## XAQUUQDA

**6.** Haddaad shaqeeyso 8 saacadood ama in ka badan oo xiriir ah, waa in lagu siiyaa waqti kugu filan oo aad raashin ku cunto.

**7.** Loo shaqeeyuhu waa inuu kuu xisaabiyaa hal iyo bar, halkii saac oo dheeraad ah (overtime) oo aad shaqeysidba. Sharciga gobolku wuxuu dheeraad ku tilmaamaa wixii ka badan 48 asbuuciiba. Loo shaqeeyayaasha ay soo gasho ugu yaraan 500,000 oo dollar sanadkii waxaa sharciga qaranka farayaa inay bixiyaan saacado dheeraad ah wixii ka badan 40 saac asbuuciiba.

## XAQUUQDA

**8.** Caruurta (ka yar 18 sano) waxaa ka mamnuuc ah shaqooyinka qaarkood. Ardeyda dugsiga sare ee 18 ka yar waxaa suurtoagal ah ineysan shaqeyn karin waxii ka dambeeya 11ka saac ee habeenimo ama waxii ka horeeya 5ta subaxnimo maalmaha dugsigu jiro. Caruurta ka yar 16 sano waxay shaqeyn karaan saacado xadidan. La xariir Qeeybta Sharciyada Shaqada haddaad rabtid inaad ogaatid shaqooyinkaas iyo saacadaha AAN la ogoleyn.

**9.** Waxaad xaq u leedahay in meesha aad ka shaqeeyso ay noqoto meel ammaan ah oo aan qatar laheyn. Haddey jirto halis xaga jirka ama caafimaadka ah la xariir Waaxda Amniga iyo Caafimaadka Shaqada (OSHA).

## XAQUUQDA

**10.** Haddii shaqada dhaawac kaa soo gaaro isla-markiiba la socodsii loo shaqeeyaha. Loo shaqeeyuhu wuxuu ku qasbanyahay inuu ku siiyo caymiska magdhowga shaqaalaha.

**11.** Loo shaqeeyuhu waa inuu abuuraa deegaan shaqo oo ka xor ah dhibaatooyin la xiriira midabka, diinta, jinsiyada. Waxii xad-gudub ah la soo socodsii Waaxda Xaquuqul Insaanka.

**12.** Haddii shaqadu kaa dhamaato la xariir Xarunta Shaqaalaha ee kuugu dhow si aad u dalbato caymiska dib u shaqeysiinta.

## XAQUUQDA

Isticmaal **800-DIAL-DLI** si aad ula xariirto meelaha soo socda, ama garaac lambaradan hoose.

Minnesota OSHA	(651) 284-5050
Sharciyada Shaqada	(651) 284-5005
Ceymiska Shaqaalaha	(651) 284-5005
Human rights	(651) 296-5663 (800) 657-3704

Wixii faahfaahin ah kala xariir bogga internetka:  
[www.dli.mn.gov](http://www.dli.mn.gov)

Maajo 2001



Waxaa diyaariyey  
Qeybta Xeerarka Shaqada  
Waaxda shaqada iyo warshadaha ee Minnesota

SHAQAALAHA  
MINNESOTA

**LA SOCO  
XAQUUQDAADA**  
*KNOW YOUR  
RIGHTS (Somali)*

TILMAAME-BIXIYAHA  
SHAQADA